



# Orientation to Ontario

## WAXBARASHADA KULEEJKA

### KULEEJYADA IYO JAAMACADAHA

Kuleejyada ayaa bixiya barnaamijyada diirada saara xirfada oo kuu sahlaaya shaqooyinka tignooloojiyada, caafimaadka, ganacsiga, hudheellada, dalxiiska iyo shaqooyinka kale. Barnaamijyada shahaadada ayaa badanaa u baahan hal sano oo axbarasho ah. Barnaamijyada dhibloomada ayaa u baahan labo ama saddex sano oo aad waxbarashada si buuxda u wado. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan kuleejyada Ontario, booqo [ontariocolleges.ca](http://ontariocolleges.ca)

Jaamacadaha ayaa bixiya barnaamijyada waxbarashada heerka koowaad ee jaamacada (bachelor) iyo heerka labaad iyo sadexaad (maserka iyo PHD ga) ee maadooyinka farshaxankaiyo sayniska, iyo sidoo kale barnaamijyada xirfada ee waxbarashada, caafimaadka, daryeelka ilkaha, sharciga iyo injineeriyada.

Si aad u xog dheeraad ah oo ku saabsan jaamacadaha Ontario, booqo Xarunta Codsiga ee Jaamacadaha Ontario oo aad ka helayso [ouac.on.ca](http://ouac.on.ca)

### DIIWAAN GELINTA

Si guud, dhibloomooyinka dugsiga sare ayaa loo baahan yahay si lagaaga diiwaan gasho midkood kuleej ama jaamacad. Haddii aadan ka qalin jebin dugsi sare, waxaad awoodi kartaa inaad codsato adoo ah arday qaangaar ah ayadoo lagu salaynaayo khibradaada. Ardayda qaangaarka ah waa inay jiraan 19 ama ka wayn ayna yihiin muwaadin ku dhashay Canada ama haysta daganaansho rasmi ah.

Si aad xog uga ogaato taariikhaha muhiimka ah ee diiwaan gelinta jaamacadaha, booqo Xarunta Codsiga ee Jaamacadaha Ontario [ontariouniversities.ca](http://ontariouniversities.ca) ama [findlink.at/Onuniv](http://findlink.at/Onuniv)

Gudiyada dugsiyo badan oo ku yaala Ontario ayaa bixiyaa barnaamijyada diploomada dugsiga sare ee dadka qaangaarka ah. Booqo webseedka gudiga dugsiga deegaankaaga si aad u hesho xog dheeraad ah.

Sidoo kale waa suurtagal in aad diploomadaada dugsiga sare ku qaadato oonlaynka. Booqo Xarunta Waxbarashada Madaxa banaan [ilc.org](http://ilc.org)

Waa suurtagal inaad dhibco ku hesho koorsooyinka aad ku qaadatay kuleej ama jaamacad dibada ah. Xarun kasta waxay leedahay hanaankeeda qiimaynta.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan kuleejyada iyo jaamacadaha Ontario, booqo Wasaarada Tababarka, Kuleejyada iyo Jaamacadaha: [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/findschool](http://findlink.at/findschool)

Si aad u hesho xog ku saabsan kuleejyada iyo jaamacadaha afka Faransiiska ku baxa, booqo Wasaarada Tababarka, Kuleejyada iyo Jaamacadaha: [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/Frenschool](http://findlink.at/Frenschool)

### CAAWIMAADA DHAQAALAHA

Ardayda dhigta kuleejyada iyo jaamacadaha Ontario ayaa u qalmi kara caawimaad dhaqaale oo ay ka helaan Barnaamijka Caawimaada Ardayda ee Ontario (OSAP). Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [osap.gov.on.ca](http://osap.gov.on.ca)

Funded by / Financé par :

Dawlada federaalka ayaa sidoo kale bixisa dhaqaale lasoo marsiiyo barnaamijka Daymaha Ardayda ee Canada: [canlearn.ca](http://canlearn.ca)

### TABABARKA BARASHADA SHAQADA

Bartaha tababarka shaqadu wuxuu bartaa xirfad ganacsi oo ku aadan shaqo asagoo tilmaan ka helaaya shaqaalaha khibrada u leh shaqada. Mar a aad ku jirto tababar shaqo, waxaa lagu aqoonsanayaa shaqaale waxaadna helaysaa mushaar. In ka badan 150 xirfadaha shaqada ah ayaa lagu baran karaa tababarka shaqada.

Xog badan ka ogoow tababarka xirfada shaqada adoo booqanaaya [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/trades](http://findlink.at/trades)

Xog badan ka ogoow Barnaamijka Tababarka Shaqada ee DHaln yarada Ontario ee ardayda dugsi sare [oyap.com](http://oyap.com)

### MA OTAHAY?

Kuleejyada xirfada gaarka ah ee Ontario ayaan lahayn isla aqoonsiga kuleejyada dawlada, waxayna qaadaan qarash badan.

Waa muhiim inaad si taxadar leh u baarto dhammaan dookhyada.

